

GOORTUU QOF XANUUNSADO,  
DAD FARABADAN AYAA XANUUNSADA.  
Kali ma noqoneysid.

Miyaad ka walwalsan tahay xaaladda dhimirka caafimaad ee xigtadaada iyo tan xaaladda awooddaada waxqabad?

Carqaladaha la soo gudboonaada dhimirka caafimaadka waa kuwo iska caam ah.  
Finland labadii qofba mid ayuu haleela xanuunka dhimirka waqtiga noloshiisa.  
Xanuunsashadaasi waxeey saameeysaa reerka iyo xigtadaba.

Carqaladaha la soo gudboonaada dhimirka caafimaadka ma jirto cid loo sababeeynayo oo lagu eedayo, loomana baahna, in xanuunsashada la ceebsado.  
Daryeel caafimaad, waa la helahayaa, oo cudurro farabadan ayaa laga bogsan karaa.  
Nolosha weey wacnaan kartaa oo farxad lagu naaloon karaa, ayadoo xataa la qabo cudurka dhimirka.

#### KAALMO. RAJO. LA SOCOTA.

FinFami waa urur, bixiya macluumaadyada oo kaalmana adiga ku siinaya, haddii xigtadaada aay qabto xanuunka dhimirka ama aad ka walwalsan tahay caafimaadka dhimirka xigtadaada..

FinFamin kaalmo iyo talo siin intuba waxaa kuula diyaar ah xirfadlayaasheenna.  
FinFamilla waxeey ku leedahay daafaha kala duwan ee Finland, xiriirro aay ayadu leedahay.  
Xiriirrada aay leedahay waxaad ka heleesaa internetka finfami.fi

#### FinFami waxaad ka heleesaa:

- macluumaad iyo talo bixin
- taageerada jaalka
- koorsooyin
- madadaalada
- howlaha iskaa wax u qabso
- howlooyin kaleba

Macluumaadka dheeriga ah ee howlaha shaqada aay qabato, waxaad ka heli ururka- FinFami.  
Howlaha ururka waa bilaash. Si gaar ah ayaa laguugu soo wargelin, haddii kale oo uusan bilaash aheyn.

FINFAMI WAXEY KUU HEYSAA MACLUUMAADYO, KAALMO IYO RAJOGELIN MARKEEY XAALADDA ADAG TAHAY.

Talooyin adiga ku khuseeya, waa kan aay xigtadiisu la xanuunsaneeyso cudurka dhimirka

Kali ma tihid. Ka hadal xaaladdaada.

Hel oo raadi macluumaadka xanuunka.

Ka taxadir oo daryeel awoodaada waxqabad.

Caawimaad waxaad ka heleesaa tusaale ahaan xaruunta caafimaadka, teleefanka xaaladda dhibta ah la wacdo ama finfami.fi.